

XARFAHA LABANLAABMA IYO SHARCIYADOODA

Cabdirisaaq Abu-Obeida

مركز الأبحاث والتراجم العلمية
Center for Research and Scientific Translations

[1]*af Soomaaliga*

HORDHAC

Waxyaalaha hab qoraalka soomaaliga wanagsan meel mariya waxaa ka mid ah: ruuxa wax qoraya in uu ilaaliyo xeerka iyo shuruucdda ee xarfaha labanlaabma. Maxaa yeelay taasi waxa ay keenaysaa in qofka qiimo wanaagsan lagu siiyo dhigaal qoraalkiisa afka, isla markaana ku meel mari karaayo.

Mawduuca buuggani uu daaran yahay, waa meelaha ugu badan ee gafka, gawl gawlka, iyo xadgudubka, lagula kaco af keena hooyo. Waxaan u dhigay qaab aad ufudud oo lawadda fahmi karo, isla markaana jirin cid iga horeesay oo qaabakan ballaadhan udhigta kana bixisa sharaxaad gudda ballaadhan, una gaar yeesha meel loogu soo haggaagi karo, anoo raacinaya xuquuqda cidda aan kazoo xigtay ama aan kazoo dheegtay.

Sida ay dad badan ogyihiin xarfaha labanlaabma waa todobo xaraf, waxaanay todobadaa xarafi ka mid yihiin: Shibbaneyaasha oo ah;

B, T, J, X, KH, D, R, S, SH, DH, C, G, F, Q, K, L, M, N, W, H, Y

↑intaa ayaa lagu magacaabaa ***Shibbaneyaal.*** Toddabada xaraf waxa ay kala yihiin:" *M,N,L,G,R,D* iyo,*B."* Waxa toddobadaas shibbane lagu baaadi soocaa halkan eray oo ah "*MANALAGARAADBAA*" Kuma jiraan shaqaladdu.

Mar kasta shibbanayaashaasi, ma labanlaami karaan, hase yeeshee waxa lama huraan ah in maraxadaha qaarkood la labanlaabo.

Xaraf kale oo af Soomaaliga ku jira oo labanlaabmaaa hadda xeerka guddiga Farsoomaaligu ay dejiyeen kuma jiro.

Sidee lagu aqoonsan ama lagu garan karaa xarfaha labanlaabma?

Xarfaha Labanlaabma waxaa lagu garan karaa si fudud. Qof kasta oo afka Soomaaliga ugu hadla sidii afkiisa hooyo ama af Soomaali ku soo barbaaray oo maalin walba ku hadla, ma dhibi karaan sida lagu garto labanlaabka, sababtoo ah qofkii oo si caadi ah isaga hadlaya ayaa dhawaaqiisa si aad u sahlan uga dhex garan kara xarfihii labanlaabmayey.

---

[1] Siyaabo badan ayaa loo qoraa af Soomaaliga (Qaab qoraal ahaan) wax aka mid ah: *Af-soomaaliga, Afsoomaaliga, af soomaaliga, af-soomaaliga, Af soomaaliga, af Soomaaliga* IWM. Haddaba, habkan kala duwan, waxaa ugu habboon in la adeegsado qaabka midka ugu dambeeya (oo ah *af Soomaaliga*), maxaa yeelay: Ereyga af waa magac guud, oo uma baahna in xaraf wayn lagu bilaabo, laakiin ereyga *soomaali* waa magac gaar ah, oo loo baahan yahay in xarafkiisi hore la weyneeyo. Cabdalla Cumar Mansuur (Midaynta Hab Dhigaalka af Soomaaliga)

Haddaba waa sidee

1 Xarafka labanlaabmaya waa in uu ka mid yahay toddobada xaraf ee aynu hore usoo xusnay.

2 Xarafka labanlaabmaya waa in uu dhawaqiisu adag yahay oo waa sida Qur'aanka Kariimka lagu yaqaan ayey u shidan yihiin oo carrabka ayey ku dhagaan. ***Tus: Carrab, Barre, Dallad, iwm.***

3 Xarafka labanlaabmaya waa in uusan ugu dambeyn erey ama ugu horeen. ***Tus: Dad, Buug, isagoo ugu horeeya waxa utusaalo ah: Daad, iwm. Oo inaad qortid DDaad waa qalad.***

4 Xarfaha labanlaabma waxa ay labanlaabmi karaan marka ay ereyga dhexda kaga jiraan.

5 Xarafka labanlaabmaya waa in uu u dhaxeeyaa laba shaqal *(shaqal dheere iyo/ama shaqal gaab)*

Haddaba maxay yihiin shaqaladu; ***A,E,I,O,U*** intaa ayaa la'isku dhahaa shaqalo.

- ***Kuma bilaaban karaan ereyga iyaga oo labanlaaban sida Ddad.***

Mararka qaarkood ↓

ayaa ay qoraalkaagu dhaliil ama faham la`aan la soo dersi kartaa. Markaana waa marka erey uu ku jiro xaraf labanlaaban aad labanlaabi waydo. Sida Carrab = Carab. Waxa uu kaa yeelanayaa macnihii weedha aad qoreyso kuugu jirey mooyee macno kale. Tusaale Yaxaasku Carab ma leh. Wargeysku waa bile iyo wixii la halmaala.[2]

Haddaba waxaan soo uruuriyay inta badan ereyadaas, si aad uga digtoonaato marka uu qorayo ereyadaas.

1. *Aabbe*
2. *Abboowe*
3. *Addeecid*
4. *Addimid (salaad)*
5. *Addoon*
6. *Adduun*
7. *Ammaan*
8. *Ammaanid*
9. *Ammin*

10. Ammuur
11. Annaga
12. Arrad
13. Arrad-bax
14. Arrafo
15. Arrimin
16. Arrin
17. Baaddiye
18. Babbanayo (calan)
19. Babbin
20. Babbis
21. Beddel
22. Beddelid
23. Ballaarasho
24. Ballaaran
25. Ballac
26. Ballamid
27. Ballan
28. Ballan-darro
29. Ballan-qaad
30. Balli
31. Bannaan
32. Bannaanbax
33. Banneyn
34. Barriiqasho
35. Berri
36. Billad
37. Caaddil
38. Caaggan
39. Cabbaar
40. Cabbeyn
41. Caddaalad
42. Caddaan
43. Caddeyn
44. Caddeys
45. Caddibid
46. Caddad
47. Caddilan
48. Caddilid

49. Cammiran
50. Cammiran
51. Cammuud
52. Carraabo
53. Carraale
54. Carrab
55. Carra-geddis
56. Carro
57. Carruur
58. Ciddi
59. Cillaan
60. Cillad
61. Cirrid
62. Cirraale
63. Dabbaal-deg
64. Dabbaalnimo
65. Dallad
66. Dallac
67. Dallaayad
68. Dallac
69. Dallad
70. Dallicid
71. Dammiin
72. Dhabbacasho
73. Dhallaan
74. Dhallin
75. Dhallinyaro
76. Dhammaad
77. Dhammaan
78. Dhammeyn
79. Dhammeys
80. Dhamme
81. Dheddig
82. Dheddignimo
83. Dheddigood
84. Dheelli
85. Dheellitir
86. Dillaac
87. Doolli

88. Dulllaal
89. Dulleyn
90. Dulli
91. Eebbe
92. Eeddo
93. Edeb-darro
94. Faalallow
95. Faalleyn
96. Faallo
97. Fallaago
98. Fallaagoobid
99. Fallaar
100. Falliir
101. Fallisid
102. Fillaansho
103. Gabbasho
104. Gabbal-dhac
105. Gabbal-daye
106. Galley
107. Gammuun
108. Garramid
109. Garruun
110. Geeddi
111. Geddis
112. Geddisley
113. Gobannimo
114. Guddi
115. Guddoomiye
116. Guul-darro
117. Habboon
118. Habboonaan
119. Habeennimo
120. Hadda
121. Haddaba
122. Haddeer
123. Haddii
124. Hammi
125. Hannaan
126. Harraad

127. *Harraadsan*
128. *Hidde*
129. *Hiillo*
130. *Hoggaamin*
131. *Hoggaan*
132. *Illaa*
133. *Illoobid*
134. *Illow*
135. *Illowsiin*
136. *Illin*
137. *Itaal-darro*
138. *Jaalle*
139. *Jalleecid*
140. *Jeebbo*
141. *Jillaabid*
142. *Jirro*
143. *Jirrid*
144. *Jubbad*
145. *Kabbasho*
146. *Kaddib*
147. *Kallahaad*
148. *Kalli/Kelli*
149. *Kallifid*
150. *Kalluumeysi*
151. *Kalluun*
152. *Karraani*
153. *Kharribid*
154. *Kharriban*
155. *Kolley*
156. *Korreyn*
157. *Kubbad*
158. *Kulli*
159. *Kulliyad*
160. *Kulligeed*
161. *Labbis-lebbis*
162. *Lallabo*
163. *Lalleemo*
164. *Lillaahi*
165. *Luggooyo*

166. *Maarriin*
167. *Macallin*
168. *Macallinnimo*
169. *Maddiibad*
170. *Marras (maato)*
171. *Masalle*
172. *Mu'addin*
173. *Muddeyn*
174. *Muddo*
175. *Musallifid*
176. *Naallo*
177. *Naalloon*
178. *Nasiib-darro*
179. *Naxariis-darro*
180. *Oddoros*
181. *Oddorosid*
182. *Oddorosid*
183. *Oggol*
184. *Oggolaansho*
185. *Oomman*
186. *Oommanaan*
187. *Oommane*
188. *Qaabbilid*
189. *Qaab-darro*
190. *Qaaddi*
191. *Qaaddo*
192. *Qaalli*
193. *Qaddar*
194. *Qaddarin*
195. *Qallajin*
196. *Qallal*
197. *Qalleyn*
198. *Qalliin*
199. *Qallooc*
200. *Qarracan (naxdin)*
201. *Qorrax*
202. *Qorraxeyn*
203. *Qorriin*
204. *Quuddarrayn*

205. Raalli
206. Raalli-gelin
207. Raalliyo
208. Rabbaayad
209. Rabbeyn
210. Rabbi
211. Rimman
212. Rummaan (geed)
213. Saddex
214. Saddexaad
215. Saddexan
216. Saddexley (ciyaar)
217. Sallaan (jaranjaro)
218. Sallax
219. Salli
220. Sallixid
221. Sammi
222. Sarreyn
223. Sarreeye
224. Sarrif
225. Sarriig (xishood)
226. Shabbad
227. Shabbadeyn
228. Shallaayid
229. Shalleyto
230. Shiddo
231. Shiddeyn
232. Shibbane
233. Siddeed (tiro)
234. Siddeetan
235. Soddog
236. Soddoh
237. Soddomeeyo (tiro)
238. Soddon
239. Soomaalinnimo
240. Sunne
241. Sunni
242. Suubban
243. Taabbagal

244. Taallo
245. Tallaabo
246. Tallaal
247. Tallaalan
248. Tallaalid
249. Tarraq
250. Toddobaad
251. Toorrey
252. Ummad
253. Ummi
254. Ummul
255. Ummuliso
256. Waalli
257. Waddan
258. Waddani
259. Waddo
260. Wallac
261. Warramid
262. Warran
263. Warriiq
264. Xabbad
265. Xabbis
266. Xaddi
267. Xagga
268. Xaggee
269. Xammaal
270. Xammaalid
271. Xammeeti
272. Xarrago
273. Xarriijin
274. Xarriiq
275. Xarriiqid
276. Xiddig
277. Xilli
278. Xorriyad
279. Xorriyo
280. Xuddun
281. Xuddumid
282. Xudduud

283. Xubbi

284. Xummad

Xarfaha laban-laabma marka ay noqdaan wadar ama wax laysla yaqaanno:

Waxaa jira xarfo badan oo laban-laabma marka ay noqdaan wadar ama wax laysla yaqaanno. Waxaa xarfahaas ka mid ah:[3]

1. Arrimaha

2. Badda

3. Bannaanka

4. Berriga

5. Caddaaladda

6. Deegaannada

7. Dekedda

8. Dhallinyarada

9. Dowladda

10. Fasallada

11. Gaashaandhigga

12. Gobollada

13. Guddiga

14. Hay'adda

15. Hobollada

16. Howlgallada

17. Jaaliyadda

18. Kubadda Cagta

19. Maaliyadda

20. Maamullada

21. Maxkamadda

22. Nabadda

23. Nadaafadda

24. Qaaradda

25. Ragga

26. Saldhigga

27. Sawirro

28. Siyaasadda

29. Taalla

30. Toddobaadka

31. Ummadda

SOMALI WIKI [3]

32. Wakaaladda
33. Wakiillada
34. Wasiirrada
35. Xarigga
36. Xildhibaanno
37. Xildhibaannada
38. Xilliga
39. Xilliyada
40. Xoogga Dalka
41. Xooggan
42. Yaalla

Maskaxda ku hay afarta qodob ee hoos ku qoran:

1. Xarafka labanlaabmaya waa in uu ka mid yahay toddobada xaraf ee m,n,l,g,r,d,b.
2. Xarafka labanlaabmaya waa in uu dhawaqiisu adag yahay (sida kor ku qoran).
3. Xarafka labanlaabmaya waa in uusan ugu dambeyn erey ama kelmad uu ku jiro.
4. Xarafka labanlaabmaya waa in uu u dhaxeeyaa laba shaqal.

Fiiro Gaar ah[4]

1. Tixgali heerka aqooneed ee akhristaha qoraalkaaga.
2. Ku dedaal adeegsiga af dadku wada garan karaan, oo ka fagowow afguriga.
3. Ku dedaal higgaadinta saxda ah***, gaar ahaan xarfaha labalaabma***…

Dhayalsiga Shibbanayaasha Labanlaabma[5]

Maalin baa meel Internet Café ah oo ku taalla magaalada London waxa soo gelaysa Islaan aad u da’ weyn oo Ingiriis ah. Waxa ay isla markiiba dhaadaysaa oo isha la helaysaa warqad wargelin ahayd oo meel derbiga ka mid ah ku dhejisnayd oo xanbaarsanayd qoraal gibin ah oo Af-ingiriis ah. Waxa qoraalkaas ereyada ku qornaa ka mid ahaa kelmedda *ACCOUNT* oo si kama’ ah ugu qornayd *ACOUNT*. Islaantu waxa ay judhiiba dareentay khaladkaas meesha ku jira. Iyada oo haddaba muraaradillaac ah, ayay inankii meheradda hayey, waxa ay si naxariis leh, uga codsatay inuu ama kelmeddaas xaqeeda mariyo oo ka saaro khaladka ku jira ama uu meesha wargelintaas ka fujiyo.

---

[4] Muxammad Yuusuf (NUUN)
[5] Maxamed Baashe X. Xasan (SOMALITALK)

Qiiradu waxa sii badanaysaa oo heerka argagaxa ku sinmaysaa haddii la eego af Soomaaliga dadka intiisa badani qoraan iyo sida aan in badani ugu aabbayeelin sida ereyadu u qormaan, gaar ahaanna xarfaha ama shibbanayaasha labanlaabma ee afka Soomaaliga…

Raadraac:

Midaynta Hab Dhigaalka af Soomaaliga *(Cabdalla Cumar Mansuur)*
Hiiraan Online *(M, Aden)*
Somali Wiki
Somali Talk *(Maxamed Baashe X. Xasan)*
NUUN *(Muxammad Yuusuf)*

+252 63 6163096
+252 63 7840707
centerforresearchsomali@gmail.com
facebook.com/profile.php?id=61550944828242